# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

### Kal-fadhigii 29aad Fadhigii 2aad

### Axad 29/11/2015

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:09AM**

**Gudoomiyaha:-** Baashe Maxamed Faarax

**Quraan:- Xildibaan Obsiiye**

**Ajendaha Fadhiga: -** Dooda Ajendaha kal-fadhiga 29aad

**Gudoomiyaha: -** Fadhigii shaley waxaa mudanayaasha loo qeybiyay ajendihii kal-fadhiga, markaa manta waxaynu bilaabeynaa dooda ajendaha oo aan Mudanayaasha ka qeyb-galaya ku soo dhoweynayaa.

1. **Md. Naasir X. Cali Shire:-** (2min, 17 sec) Mudanayaal iyo Shirgudoon waan idin salaamayaa, salaam ka dib, markii aan aad u dhugtey Ajendaha kal-fadhigan waxaan runtii aad u arkey waxaan u arkey in Xeer muhiim ah oo dalkeenu u baahan yahey in laga tagey, Xeerkaas oo ah mid muran badan dhaliyay ka dib markii la wareejiyay Haamaha shidaalka iminka aad loo hadal hayo in meel kale la wareejinayo, markaa Xeerkaas waa **Xeerka Maareynta Hantida Qaranka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah**, waxaana Xeerka si sheegaya Dastuurka Qodobkiisa 12aad, markaa dastuurku wuxuu si cad u sheegayaa in xeer loo sameeyo sida kheyraadka iyo hantida loo maamulayo, markaa mudanayaal waxaan qabaa ineynu u baahanahey in Xeerkaa la curiyo.

   Waxa kale oo ka maqan Xeer kale oo muhiim ah kaas oo ah **Xeerka Miisaaniyada Qaranka,** waayo sanad walba waxaa hortimaada Misaaniyada Qaran oo aynu duuduub ku ansixino inta badan, markaa xeerka Miisaaniyadu isna waa muhiim aan qabo in lagu soo daro.

   **Xeerka Bangiga Ganacsiga,** Xeerkaa oo aad dalku ugu baahan yahay waxaan soo jeedinayaa in isaga ugu soo horeysiino oo isaga ansixino marka ugu horeysa, waayo dalku wuxuu u baahan yahay in aduunku yimaado oo maalgashado.

2. **Md. Xaamud CIsmaan Cigaal:-** (6min, 20sec) Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo saxaafada waxaan idinku salaamayaa Salaanta islaamka ASC, waxaan in badan ka Hadley iyadoo xeerar muhiima yaaliin Golaha aan kuwa kale la inoo keenin, waayo mudada aynu heysano hawsha kala badaneysa, marka sida wax inoogu kala soconayaan ayaan fiican inaynu u kala horeysiino.

   **Waxaan u kala horeysiinayaa sidan:-**

   - Wax ka badalka iyo kaabista Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada.
   - Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada
   - Qabyo-qoraalka Xeerka Maareynta Maaliyada iyo Xisaabaadka.
   - Anxisinta Miisaaniyada Qaranka.

- Qabyo-qoraalka Xeerka Dakhliga Cashuuraha Bariga
- Xeerka Qandaraasyada Somaliland.

**Waxaan ka saarayaa ajendaha:-**

- **Xeerka Kufsiga:-** waayo islaamku wuxuu ka qabaa dhaqan iyo sharci gaar ah, maantana dhibaato badan baa wadanka ka jira oo dhaqan xumo.
- **Xeerka Ganacsiga Bangiga:-** technically inuu soo galo maaha, sababtoo ah Gudi baa loo saarey Iyana warbixin bay ka keeneen, warbixintaasna Golaha ha loo qeybiyo, waxa cadaabta lagu galayo iyo wixii kale ha lakala ogaado, markaa xeerkaas wax badan buu u baahan yahay in horta la eego, ribadu waa xaaraan, ribadu waa xaaraan.
- **Xeerka Doorashada Golaha Guurtida:-** guurtida maxaa lagu doortey, miyaynu dooraney awal, beelihii baa isu tagey oo dhaqan baa lagu kaanay, waayo hadeynu guurtida doorano waynu siyaasadeyney hadii sidaa la sameeyona wadanku wuxuu galayaa muran xun oo aan hadhow laga bixi Karin.

3. **Marwo. Baar Siciid Faarax:-** (2min, 50sec) Waan salaamaya Golaha, Shirgudoonka, Saxaafada iyo Shaqaalahaba, bacda salaam, ajanduhu aad iyo aad buu u wanaagsan yahey intiisa badan oo waan taageerayaa waana soo dhoweynayaa, waxaan doonayaa inaan ka hadlo **Xeerka Kufsiga**, kufsigu waa aafo dalka heysata, sinaduna waa xaaraan oo diinta sheegaysa, waa nasiib daro halka kufsigu dalkeena ka marayo hadeynu manta indhaha ka qarsano, wuxuu ahaan jirey gabadh iyo wiil meel iska helay laakiin imika waa kufsi wadar oo 10, 7 ama 8 wiil baa gabadh meel u galaya, markaa waxaan soo jeedinayaa hadaan arrinkaa wax laga qaban waxay noqoneysaa aafo dalka wada saameysa, markaa waa Xeerka kufsiga waxa ugu horeeya laga soo dhigo.

   Magaalada Xeebeedka la yidhaahdo Xarshow waxaa ka soo caaryay booyad moorgareysan oo aan dabool laheyn oo xadhko ku xidhan yihiin dabeylihii baa soo saarey magaalada ayayna agtaal oo laba wiig ag taaley mana laha dabool sidaan sheegay waxba ku qoran tiro iyo magac, waa la soo sawirey oo warbixinteedii waa la keenay Wasiiradii gobolka joogay baa loo keenay oo ilaa xukuumada halkan waa la keenay wax laga qabteyna ma jirto waxayna u egtahey Haantaa Magaalada dhextaal inay sun tahey, markaa arrinkaa waa in Goluhu wax ka yidhaahdo. Waadmahadsantihiin.

   **Point of Clarification, Gudoomiye Baashe: -** xildhibaan baar way mahadsan tahey, Waynu ka dabatageynaa arrintaa waxay tahey oo Gudidda kheyraadka dabiiciga Gudoomiyaheediina wuu joogaa oo isaga iyo Gudiddiiisa ayay laga sugayaa inay soo baadho oo warbixin golaha ka soo siiso.

4. **Md. Siciid Warsame Ismaaciil:-** (2min, 51sec) Shir-gudoonka sharafta leh, Mudanayaasha iyo saxafadaba waan salaamayaa, ajendahan intiisa badani waa waxyaabihii inaga hadhey kuwii hore, waxase meesha ka muuqata in laga tagey Xeer oo kal-fadhigii horena aan soo jeedinay Xeerkaas oo ah Xeerka Maareynta Hantida Qaranka kaas oo aynu u aragney inuu yahey mid lagama maarmaan ah sababto ah mar hadii hantidii qaranka si aan xisaab laheyn ay isaga socoto, mar hadii Xukuumadii soo abuuri weyday oo keeni weyday waxa lagama maarmaan ah inaynu inagu abuurno oo Golaha horkeeno Xeerkaa.

**Waxaan ka saari lahaa Ajendaha:-**

- Xeerka Saxaafada:- waayo saxaafadu xeer bay leedahey.

**Waxaan ku darayaa:-**

- Xeerka Miisaaniyada
- Xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka waliba shacabka leyntooda asarku caadeysatey, markaa arrinta waliba waxaan soo jeedinayaa in lagu daro Ajendaha in loo yeedho jananka Ciidaanka Booliska iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha.

5. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** (5min, 34sec) Ajendaha had iyo jeer waxaynu ku soo darnaa oo halkana ku jirta xog-ogaal u noqoshada Xaalada dalka, marka waxay u baahan tahey in cadeeyo markasta, anigu waxaan odhan lahaa inaynu qodobeyno oo ka dhigano sidan:-

- **Xog-ogaal u noqoshada Siyaasada Arrimaha Dibada:-** waa inaynu ogaano sida ay shaqeyneyso siyaasada arrimaha dibada dalku.

- **Xaalada Bariga dalka:-** oo hadaan afka ku dhufto xaalada Beelaha hartida, hadaad eegto sida wax u socdaan dalkeena istiigad baa sidaa u marsan, inta badan waxaynu nidhaahnaa hartiyow u kaadiya, waxyaabo badan baa ka socda ilaa Gal-gala, marka anigu waxaynu leeyahey ileyn gole siyaasadeed baynu nahaye bal doorkan aynu gaar ka dhigano xaalada Goboladaa barriga iyo Hartiga ee wadanku laangadhe ka yahey, ee aan Maamul ka jirin, ee marka la soo hadal qaado la leeyahey bal horta hartiga u kaadiya oo halkaa inaga dhiga, boqol wax baa laga sheegayaa, markaa labada qodob aynu ku soo koobno xog-ogaal noqoshada xaalada dalka.

**Waxaan ka saari lahaa Ajendaha:-**

- **Xeerka Doorshada Golaha Wakiilada**:- Xeerka kal-fadhigii horena waynu soo qaadney oo buuq baa ka dhashey, maxaa buuqa ka keenay, Xeerka mabdi'iyan baan heshiis lagu aheyn, ilaa Xeerka mabaadiidiisa iyo siyaasadiisa laga heshiiyo waxba socon maayaan oo Goluhu ma sameyn karayo waayo Deegaamo iyo waxyaabo badan buu saameyn ku yeelanayaa, waxaa jira duruufo siyaasiya oo gobol kasta qabo, markaa waxaan soo jeedinayaa yaynaan doodiisa ku dhex dhicine waa in Gudi loo saaro oo soo daristo.

**Waxaan xaga hore soo dhigayaa:-**

- **Xeerka Ganacsiga Baananka:-** Hadaad eegto baanankeena wax xidhiidh ah oo ay dunida la leeyihiin ma jirto, markaa waxaan leeyahay Xeerkaas oo mud dheer golaha dhex yaaley waxaa loo baahan yahey in Xeerkaasi ina dhaafo oo xaga hore soo marino oo ha dhaafo Goleheena.

6. **Md. Cali X. Maxamed: -** (2min) Shirgudoonka, Xildhibaanada iyo martidaba waad salaaman tihiin, salaanta ka dib, xeerarka ina horyaal qaarkood way cusub yihiin, qaarna waa kuwii hore u heynay, markaa waxaa loo baahan yahay in sidey u kala muhiimsan yihiin in loo kala horeysiiyo.

**Waxaan ugu horeysiinayaa:-**

- Wax ka badalka Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada:-
- Wax ka badalka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada.
- Xeerka Ganacsiga Baananka.

7. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-**(2min, 2sec) Shir-gudoonka, Mudanayaaasha iyo Saxaafada dhamaan waan salaamayaa, anigu waxaan ka hadlayaa:-
    - **Xeerka Kufsiga:-**Xeerkaa qolyaha Maxkamadaha ayaa u baahan in dib loogu celiyo oo aynu talo badan ka qaadano, waayo kufsigaas wadanka aad buu ugu baahey, waa in aynaan inagu wax iska sameyne aynu culimada iyo Maxkamadaha la kaashano.
    - **Wax ka badalka Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada:-** Xeerka Ajendaha kal-fadhigii hore ayaa laga saarey, mar hadii Xeer ajendaha laga saarnoa waa inaan mudo lix bilood ah aan dib loogu soo celin Golaha, oo lixdaa ka bacdi ayaa la soo celin karaa, markaa maaha in la iska soo celiyo, wuxuuna u baahan yahay hawl badan oo anagu goboladii ka cadhoodey baan ahayn markaa maaha in maantana lagu soo celi.
    - **Xeerka Ganacsiga Baananka: -** Xeerka Waxaan soo jeedinayaa in xaga hore la soo dhigo.
    - **Xeerka Hay'adda Wadooyinka:-** Xeerka waxa weeye Mashaariic badan oo wadooyin ah ayaa dalka ka socda, markaa waxaan soo jeedinayaa in isna xaga hore la soo mariyo. Waad mahadsantihiin.

**Point of Clarification, Gudoomiye Baashe: -** Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada, waxaa loo dhiibay Gudidda Arrimaha Gudaha oo gacanta ku heysa, walina golaha kuma soo celin, markaa hadba xeerkii diyaar ah baa la keenayaa, waxaana ku qoran in Gudiddaasi gacanta ku heyso aynu ka sugeynaa.

8. **Md. Maxamed Saalax Cige:-**(5min, 05sec) Shir-gudoonka, Mudanayaaasha iyo Saxaafada dhamaan waan salaamayaa, Xeerkani wuxuu u badan yahey Xeerarkii hore kuwa cusubna waxay u badan yihiin Xeerar maaliyadeed oo cusub, waxaan soo jeedinayaa in horta lagu soo daro oo aan ku raacsanahey mudanayaashii soo jeediyay in Xeerka Miisaaniyada lagu soo daro ajendaha, intaan kuwa maaliyada la galin, Waxaan soo jeedinayaa:-

    - **Xeerka Kufsiga:-** Xeerka kufsigu asal ahaan wuxuu ku jiraa Xeerka Ciqaabta Guud ee iminkaba lagu shaqeeyo wixii kufsi ahna isaguun baa lagu xukumaa iminka, markaa hadeynu dooneynu inaynu bulshadii wax ku celino yaynaan soo qaadan kufsi uune Xeerka Ciqaabta Guud oo dhan inta ajendaha lagu soo daro wax badal iyo kaabis ha lagu sameeyo, (Secondment buu helay), xeerkaa waxaa la sameeyay 1962kii oo maaha mid la jaanqaadaya wakhtigan waxaana la sameeyay wakhtigaa fog ee dawladii somaliya oo wali jaale siyaad baa ku saxeexan, marka waa in Xeerka ajendaha lagu soo daro oo aynu qabyo tirno.

- **Xeerka Ganacsiga Baananka: -** Xeerka Gudi gaar ah baa loo saarey markii saddex jeer laga doodey, gudida loo saarey si ay shareecada iyo culimada ula soo eegto, waxa intaa xeerkaas dib u dhigayay waa arrinta ribada oo asal u ah xeerka, dastuurku wuxuu tilmaamayaa wixii shareecada ka soo horjeeda ay waxba kama jiraan tahey, hadii aynu u badheedheyno Xeerka maadaama uu asal u yahey ribada diyaar ha loo ahaado Xeerkaa.

- **Xeerka Maareynta iyo ilaalinta Hantida Qaranka: -** waxaan taageersanahey mudanayaasha soo jeediyay in Xeer loo sameeyo ilaalinta iyo sida loo wareejin karo hantida qaranka, markaa waxaan soo jeedinayaa anigoo taageersan mudanayaashii soo jeediyay in Xeerka lagu soo daro ajendaha maantuu golihii furan yahaye.

- **Arrinta Warbixinta Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka:-** Gudiddaasi waxay soo martey Gobolada dalka oo dhan waxay ka soo diyaarisey warbixin taabaneysa Gobolada, waxa miisaaniyada ka gaadha, sida Xeerarkii loogu dhaqmo iyo hadey jiraan Xeerar baahiyo loo qabo, warbixintaas waxay ku soo bandhigeen Maansoor oo Wasiiro iyo Mudanayaalba ka qeyb-galeen aadna loogu riyaaqey, markaa Waxaan soo jeedinayaa in wixii Xeerar eek a soo baxay Warbixintaas halkan ajendaha sidooda loogu soo daro.

- **Xeerka Saxaafada: -** Waxaan ku raacsanhey Mudane Siciid Warsame maadaama Xeerkii saxaafadu jiro oo shaqeeyo sabab halkan loogu soo daro oo lagaga qeyliyayna aaney jirn maaha in lagu soo daro ajendaha, markaa waxaan soo jeedinayaa in Xeerka laga saaro. Ajendaha. Waad mahadsantihiin.

9. **Md. Maxamuud Axmed Obsiiye: -** (7min, 08sec) shirgudoonka iyo golahaba waan salamayaa, salaam ka dib ajanduhu aad ayuu u balaadhan yahay.
   - Xeerka Ganacsiga Baananka:- Ugu horayn waxaa diyaar ah sida aan la wada socono mudana laga soo shaqaynayay xeerka baabanka ganacsiyaga ayaan soo jeedinayaa marka laga reebo wixii ribo sheegaya ha la ansixiyo oo ha loo horaysiiyo ayaan soo jeedinayaa
   - Xeerka kufsiga: - waxaa uu ku jiraa xeerka ciqaabta guu ee kaana meesha halaga saaro ayaan soo jeedinayaa waana in laga dhigaa xeer guud oo ka hadlaya anshaxa iyo edebta guud ee waa in aan lagu soo koobin kufsi oo kaliya.
   - Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada: - halaga saaro ayaan soo jeedin lahaa oo ha loo isticmaalo sidii hore ee ahaa isticmaalka halka mar ah, waxan soo jeedinayaa in madexweynaha loo gudbiyo oo haloogu soo bandhigo sidii 2014-kii waanad mahadsan tihiin.

10. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** (2min, 42sec) shirgudoonka iyo golaha sharafta lihiba waa salaamanyahay, waa laga hadlay waxyaabihii mihiimka ahaa oo dhan, kaliya waxaan u baxay midh qudha oo ah xeerka bangiga tijaariga ah weeyi waayo in badan ayaan ka shaqaynaya waxaanu leeyahay waxyaabo badan oo faa'iido leh oo ay ka mid yihiin shaqo abuuris, wadooyin samayn iyo waxyaabo badan oo kale aniga waxay ila tahay in aan u baahanahay 10 ilaa 15 ayaynu u baahanahay, waayo wixii ribo ah waynu ka saaraynaa waana in xeerarka loogu horaysiiyaa.

11. **Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** (4min, 58sec) aad ayaan u salamayaa dhamaantiin intii badnayd waa la qod qoday ajandaha, kaliya waan soo koob-koobayaa

Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro-

- Xeerka kufsiga: - sida la sheegay waxaa uu ku jiraa xeerka ciqaabta guud waxaanan leeyahay dib ha loo dhigo. Waxaan halkiisaa ku badelilahaa Xeerka miisaaniyada Qaranka.
- Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada: - waxaan aaminsanahay sidii uu obsiiye sheegay in dibada lagu dhameeyo oo meesha halaha saaro, waxaanan ku badeli lahaa xeerka Caasimada oo aan leeyahay hala keeno.
- Qabyo qoraalka xeerka Hanti-dhawaraha: - waxaan ku badeli lahaa wax-kabadelka xeerka hanti-dhawraha Guud waayo xeerku hore ayuu u jiray.
- Xeerka Ganacsiga Baananka:- waxaa uu u baahanyahay in aad looga shaqeeyo ee waxaan soo jeedinayaa meesha laga saaro
- Xeerka saxaafada: - waa in la cadeeyaa oo sifaha uu meesha ugu yaal lacadeeyaa.

**Waxaana ugu soo horeysiin lahaa:-**

- Xeerka Hay'ada Wadooyinka:-waa in xaga hore la soo mariyaa waayo waa xeer muhiim ah.

12. **Md. Xuseen Maxamed Cige: -**(7min, 03sec) shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salamayaa, halka waxaa ina horyaala Ajandaha oo la ina yidhi waxaad ku daraysaan ku dara iyo wixii aan ka dhimanysaan, markaa hadii aan toos u galo Ajandaha.

Waxaan soo jeedinayaa:-

- Xeerka ganacsiga baananka: - waayo waa in aan ogaanaa in aan aduunka wax la leenahay waxa isku xidhaa aduunkana waa baanaka ama (commercial banks) waana in loogu horaysiiyaa xeerkaa.
- Ka labaad waxaan ka dhigi lahaa Wax-kabadelka iyo kaabista Xeerka doorashada golaha wakiilada.
- Wax ka badalka iyo kaabist xeer-hoosaadka golaha wakiilada.
- Qaybyo-qoraalka Xeerka Dakhliga Cashuuraha Bariga.
- Qabyo-qoraalka Xeerka Qandaraasyada Somaliland.
- Xeerka Maareynta iyo Ilaalinta Hantida Qaranka:- Waxaa kale oo aan taageerayaa soo jeedintii ahayd Hantida iyo kheyraadka dabiiciga ah iyana in xeer loo sameeyaa oo ajandaha lagu soo daraa.

Waaxaan soo jeedinayaa in dib loo dhigo:-

- Xeerkaa kufsiga:-waxaan leeyahay dib ha loo hagaajiyo oo shuruucda kale hala waafajiyo waayo qodob kali ahi isma taagi karo.

13. **Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** (2min, 07sec) dhamaan shirgudoonka iyo mudanayaashuba waa ay salaamanyihiin, runtii aad ayaa looga hadlay xeerka doorashooyinka golaha wakiilada sida aan qabo waxa uu u baahanyahay xeerkaasi Research in laga sameeyo xaalad intan ka bana wuu u baahanyaha.

Waxaan soo jeedinayaa:-

- Waa in xeerka doorashooyinka golaha wakiilada laga saaraa ajandaha

- Xeerka golaha guurtida waxaan aamin sanahay in xeer dadban loo sameeyo sidiisaana uu ugu jiro
- Xeerka baankuna waa mid aan u mihiim waayo waxaa uu ka shaqeeyaa 48 wadan oo dunida ka mid ah sidaa awgeed waxaan leeyahay ha loogu soohoraysiiyo
- Xaaladaha gobolada barigu waa mid aad u mihiim ah sida mudanayaal badani ka dhawaajiyeen waxaan soo jeedinayaa in ajendaha laga saaro.

14. **Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nacnac):-** (1min, 27sec) shirgudoonka iyo xildhibaanada waan salaamayaa. Hadii aan toos u galo ajandaha.
Waxaan soo jeedinayaa:-
    - Sida ay ka wada dhawaajiyeen xildhibaanada badan koodu waxaan soo jeedinayaa in loogu horaysiiyo xeerka kaganacsiga baananka.
    - Waxaan kale oo aan ku darayaa waxaan taaganahay wakhtigii Xeerka Miisaaniyada ee iyada ayaan ku xigsiin lahaa oo aan lanbar lab aka dhigi lahaa.
    - Waxaa kale oo aan ku xigsiin lahaa oo aad iyo aad u muhiim ah xeerka doorashada golaha wakiilada.

15. **Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** (7min, 07sec) shir gudoonka iyo dhamaan xildhibaanad sharafta leh ee u samray ilaa uu dhamaanayay kalfadhigani aad ayaan ugu mahadnaqayaa, waxaan halkan ka sheegayaa xeerar badan oo ilaa 2012 aan ka shaqaynaynay oo tacab badani galey.

    Waxaanan soo jeedinayaa:-
    - Xeerka Qashinka Adag waxaanan shir-gudoonka ka codsanayaa in xeerkaa lagu soo daro.
    - Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada meesha laga saaro oo aan u dayno golayaasha imanaya meesha.
    - Xeerka Doorashooyinka Golaha wakiilada waa in meesha laga saaraa oo kii hore ee ahaa marka kaliya lagu galaa dorashada looguna soo horaysiyaa.
    - Xeerka Ganacsiga Baananka waxaan soo jeedinyaa sidii xildhibaan obsiiye sheegay in qodobada qaldan laga saaro sidiisana loo meel mariyo ayaan soo jeedinaya.
    - Xeerka Somaliland road authority waan xeer aad u mihiim ah waxaan odhan lahaa hore aan keeno.
    - Waxaa kale oo aan soo jeedinlahaa Xeerka Saxaafada ama sidiisa aan uga shaqayno ama yaan meesha la keenin waxaayo waxaa jira meesha uu ku jiro ayaan u saamaxayn in laga shaqeeyo.

**Gudoomiyaha: -** doodii way dhamaatey, Waxaynu u codeyn doonaa ajendaha fadhiga barito, waxaan ka codsanayaa in Hadal-qoraalku barri isu soo ururiyo, fadhigii wuu xidan yahey.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
------------------------------------------